HABKA QAXOOTINIMADA DENMARK



Wajiga 1aad:
- lacag ma lagu siinayo
- shaqo laguuma dirayo
- xerada soo dhowaynta

Wajiga 2aad:
- degitaan xero rasmi ah
- lacag
- shaqo iyo waxbarasho

6 bil kadib (haddii aad ogolaatid inaad dalkaga ku laabtid):
- waad shaqaysan kartaa
- magaalada waad degi kartaa

Wajiga 3aad (diidmo kama dambays ah): In laguu soo wareejiyo Xarunta celiska ee Avnstrup, kadibna xarunta celiksa ee Sjælsmark ama Kærshovedgård
- Habeenkasta in aad soo hoyatid
- Wax xaqul shaax ah ma jiraan
- Waxa shaqo mutawac nima ah, shaqo, wax barasho ma jiraan
- Shirar madan oo isbuucle ah oo la yeelan doontid booliska

REFUGEESWELCOME
Legal advice and advocacy Denmark

SOMALI

MACLUUMAAD IYO TALOOYIN GUUD OO LOOGU TALO GALAY QAXOOTIGA CUSUB

Ururka Refugees Welcome waa urur samafal ah oo madaxbanaan. Waxaanu ku shaqaynaa si iskaa wax-u-qabso ah si aan u saacidno qaxootiga. Macluumaadka ku qoran buug-yarahan waa kuwa guud oo kooban. Waxaad noola soo xiriiri kartaa si khaas ah haddii aad doonaysid talo gaar ah, cinwaankeenu waa.

www.refugeeswelcome.dk

TALOOYIN

DADKA CUSUB:

Haddii aad cusubtahay waa in:

- Aad taariikhaysid dhacdo walba oo ku saabsan nolosha-da. Adigoo cadaynaya waqtida ay wax dhaceen, meesha iyo magacyadaba.
- Marka aad buuxinaysid foomka ku qor wax walba oo muhiim. Kana feejignoow in ay is khilaafaan waxa ad ku qortay form-ka iyo waraysiyada afka ah. Waad ku qori kartaa form-ka af soomali.
- Ha dhegaysan talooyinka iyo warka saaxiibadaa lakin isku day inaad sheegtid dhibtaada iyo xaqiiqda dhabta ah.
- Dalbo turjumaan kale haddii aadan fahmayn ama uusan si fiican ugu hadlin luqadada kan laguu qabtay.
- Ku duub wadahadalka taleefankaaga, lakiin u sheeg in aad duubaysid.
- Dalbo turjumaan ku hadla luqadda english, haddii aad ku hadli kartid english fiican.
- Iska hubi wixii khalad ah ka hor intaadan saxiiixin qoraalada.
- Haddii aad u baahantahay turjumaan rag ama dumar ah, soo sheeg xilli hore.
- Su'aalaha uga jawaab si sax ah. Haddii aad jeceshahay inaad wax ku dartid hadalkaga waad kaga dari kartaa.
- Saxiix heshiiska dib-u-celinta. mar walba hadhow waad bedeli kartaa fikirkaaga.

Dhibaato cafimaad ama xanuun:
Isla markaba sheeg si aad u heshid daaweyn deg deg ah.

Maxkamadda qaxootiga:
Waad qabsan kartaa looyar gaar ah.

Talo guud:
Mar walba muuji dadaal iyo howl karnimo. iskuna day inaad kasbatid saaxiibo daanish ah.

DADKA LA DIIDAY:

- **Si ay maxkamaddu dib ugu furto kiiskaaga** (waxay qaadan kartaa qiyaastii 15 bilood) waxay u baahantahay:
  1) Warar cusub oo muhiim ah, kuwaas oo aadan hayn markii lagu diidayey
  2) Caddeeymo aad ku arkaynaysid sheekooyinkaagii hore ee la rumaysan waayey
  3) Isbedel muhiim ah oo ka dhacay dalkaagii hooyo
  4) Isbedel lagu sameeyey wax ka qabashada dacwadaha noocaaga oo kale ah.
  5) Waxa cusub hadii ay kusoo kordheen magan-galyo doonimadaada, kadib markii lagu diiday.
  (Jaanis aad u yar).
- **U-dacwoodid maxkamadda caalamiga ama tan reer yurub** (2 sano ayey qaadan kartaa):
  Haddii qareenkaaga, hay'adda Dansk Flygtningehjælp iyo ururka Refugees Welcome ay isku raacaan in kiiska-aga si khaldan loo qaaday waxaa jira karta fursan ah in dacwad aad u gudbisatid maxkamahada kor u xusan.
- **Deganaansho Bani'aadamnimo:**
  Waxaa la siiyaa dadka aadka u xanuusan oo aan dalkoo-dii hooyo ka heli karin dawayn fiican haddii la celiyo. Waana uu dhakhtarku caddeeyaa arintaas.
- **Xaas ama guursasho:**
  Haddii aad guursatid qof si sharci ah u degan Denmark waxaa sida caadiga lagaa rabaa baasaboor shaqaynaya iyo inaad dalkaagii ku laabatid oo aad xaggaas dacwad ka soo xereysatid. La taso looyar ama Refugees Wel-come.

Haddii aadan wax fursad ah haysan:
Jidka ugu fiican ee kuu furan waa inaad ogolaatid inaad si iskaa ah aad ugu laabatid dalkaagii hooyo. Dadka qaar-kood waxay heli karaan lacag cadaan ah oo celiska loogu talagalay. Haddii aadan wada shaqayn muujin, wax aad halis u tahay in lagu xiro oo lagu musaafuriyo. Intaas waxa dheer in aadan iska dhiibi karin dal kale oo yurub ah. Waxaa lagu soo celin Denmark.

TALO SHAQSIYEED:

Refugees Welcome
Fælledvej 12, opgang C, 4. sal, rum 43
2400 København N
Talaado 16-19.
Horay u soo qaado dhammaan wixii waraaqo ah oo la xiriira dacwadaada iyo weli turjumaan haddii aad u baahantahay.
Phone: 50558011
e-mail: kontakt@refugeeswelcome.dk
Facebook: Refugees Welcome, Denmark

Dansk Flygtningehjælp
(Danish Refugee Council)
Borgergade 10, 1300 København K.
Arbaco 10-13.
Na soo wac maalmahada shaqada 9-15:
3373 5000.
E-mail: advice@drc.ngo

WIXII INTAAS DHEER KA DAALACO:

Refugees Welcome:
refugeeswelcome.dk + refugees.dk

Bogga internetka ee mas'uuliyiinta deenishka:
nyidanmark.dk + hjemts.dk (also in English)